# Dawladda Kanada ayaa soo saartay *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta ee 2023*

***Bixinta qorshaha dhaqaale ee dawladda si loo dhiso dhaqaale xooggan oo qof walba u shaqeeya***

Noofambar 21, 2023 Ottawa, Ontario Waaxda Maaliyadda ee Kanada

Maanta, Marwo Chrystia Freeland, Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka iyo Wasiirka Maaliyadda, waxay dhiibtay *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023*, iyada oo qaadaysa tillaabo dheeri ah oo lagu taageerayo dabaqadda dhexe iyo in la dhiso guryo badan, si dhakhso leh.

Qorshaha dhaqaalaha ee dowladda ayaa dhisaaya dhaqaale xooggan oo u shaqeeya qof walba, oo leh shaqooyin waaweyn oo dadka Kanadiyaanka ahi ay ku kalsoonaan karaan. Qorshahanina wuu shaqaynayaa.

In ka badan hal milyan oo Kanadiyaan ah ayaa maanta shaqeeya marka loo eego masiibada ka hor. Sicir-bararka ayaa hoos u dhacaya, mushahar kordhinta ayaa ka sii badanaaya sicir-bararka, iyadoo dhaqaalayahannada ganacsiga gaarka loo leeyahayna ay hadda filayaan in Kanada ka nabadgasho hoos u dhac ay dad badani saadaaliyeen.

Iyadoo ay jirto korodh degdeg ah oo caalamiya xagga heerka dulsaarka, dad badan oo Kanadiyaan ah ayaa dareemaya cadaadis, gaar ahaan marka ay timaaddo awoodista guri ay kiraystaan ama ay leeyihiin. Iyada oo laga jawaabayo, *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023* wuxuu diiradda saarayaa labada caqabadood ee muhiimka ah ee maanta.

Ugu horrayn, dawladdu waxa ay sii waddaa taageeridda dadka Kanadiyaanka ah xilli qiimaha qaarkood ay weli aad u sarreeyaan oo dib u cusboonaysiinta deymaha guryaha ay soo food-saartay. Tallaabooyin cusub, oo la beegsaday si ay u caawiyaan xasilinta qiimaha, ka dhigidda nolosha mid la awoodi karo, iyo ilaalinta Kanadiyaanka xagga deynta guryaha, dawladdu waxay qaadaysaa tallaabo la taaban karo si ay u taageerto Kanadiyaanka. Tan waxa ka mid ah hubinta in dadka Kanadiyaanka ahi ay heli karaan kaalmada amaahda guryaha ee ku habboon ee ay u baahan yihiin wakhtiga dulsaarka sare. Si taas loo sameeyo, *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023* wuxuu ku dhawaaqayaa Axdiga amaahda guryaha ee Kanada, kaas oo faahfaahinaya gargaarka ay Kanadiyaanku ka filan karaan dhanka bangiyadooda haddii ay ku jiraan dhibaato dhaqaale.

Marka labaad, dawladdu waxay dardargelinaysaa shaqadeeda si ay u dhisto guryo badan, si dhakhso badan, iyo inay ka dhigto guryaha kuwo la awoodi karo. Iyada oo laga duulayo tallaabada muhiimka ah ee ay dawladdu horeba u qaadday, *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023* waxa uu soo bandhigayaa balaayiin doollar oo maalgelin cusub ah si loo dhiso guryo badan, si dhaso badan, waxa ay qaadaysaa tillaabooyin

lagu xakamaynayo kirooyinka muddada-gaaban si guryaha loogu isticmaalo dadka Kanadiyaanku si ay ugu noolaadaan, waxayna gacan ka geysan doontaa kordhinta tirada shaqaalaha dhismaha ee dalka oo dhan. Maanta waxa sii socota shaqada dawladda dhexe ee hogaaminaysa dadaal qaran si ay guriyaynta uga dhigto mid la awoodi karo guud ahaan Kanada.

Qorshaha dhaqaalaha ee dawladda ayaa mas'uul ka ah, waxayna u aragtaa in Kanada ay ilaalinayso deynka ugu hooseeya iyo saamiga saafiga ah ee deynka xagga GDP-ga ee G7. Dawladdu waxay qaadaysaa tillaabo dheeri ah oo ku jirta *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta ee 2023* si loo hubiyo in dhaqaalaha Kanada uu ahaado mid waara—iyo inaan sii wadi karno inaan si mas’uuliyadi ku jirto u maal-gashanno Kanadiyaanka, xoojinta dabaqadda dhexe, iyo inaan dhisno dhaqaale xooggan oo qof walba u shaqeeya.

Iyadoo qayb aasaasiya ka ah shaqada dawladda ee ah in ay maalgeliso mustaqbalka dhaqaale ee Kanada oo ay abuurto shaqooyin mushahar fiican leh, dawladdu waxa ay sidoo kale bixinaysaa cashuur-celin cusub ee maalgashiga iyada oo ku salaysan mudnaanta koowaad, iyada oo fulinta sharci-dejintu ay sii socoto maalmaha soo socda oo la soo gabagabeynayo 2024.

**Xigasho**

“Qorshaheenna dhaqaale waxa uu ku saabsan yahay dhisidda dhaqaale xooggan oo qof walba u shaqeeya, Bayaanka Dhaqaale ee Dayrtan waa wajiga xiga ee qorshaheenna. Iyadoo diiradda la saarayo taageeridda dabaqadda dhexe iyo dhisidda guryo badan, si dhaqsa leh, waxaanu tallaabo ka qaadeynaa mudnaanta ugu muhiimsan ee Kanadiyaanka maanta - waxaanan sii wadi doonnaa wax kasta oo aan awoodno si aan u gaarsiinno Kanadiyaanka min xeeb ilaa xeeb ilaa xeeb."

- *Marwo Chrystia Freeland, Ra'iisul Wasaare ku xigeenka iyo Wasiirka Maaliyadda*

**Xaqiiqooyin Degdeg ah**

Qorshaha dhaqaalaha Kanada wuu shaqaynayaa:

- Heerka shaqo la'aanta Kanada, 21-kii bilood ee la soo dhaafay, wuu ka hooseeyaa sidii ay ahayd xilligii dawladdii hore. In ka badan hal milyan oo Kanadiyaan ah ayaa maanta shaqeeya marka loo eego ka hor masiibada.
- Mushaharku wuxuu ka batay sicir-bararka sagaalkii bilood ee la soo dhaafay.
- Sanduuqa Lacagta Adduunka ee IMF waxa uu Kanada ka bixinayaa inay aragto kobaca dhaqaale ee ugu xooggan G7 sanadka soo socda.
- Marka loo eego OECD, qeybtii hore ee sanadkan, Kanada waxay heshay maalgashiga tooska ah ee saddexaad ee ajnabiga ah ee waddan kasta oo adduunka ah—iyo heerka qof-qof ahaan ugu sarreeya G7.

**Xiriirinta laxiriira**

- *Bayaanka Dhaqaalaha Dayrta 2023*
- *Bayaanka Dhaqaale Dayrta 2023*: Qiyaasaha Muhiimka ah
- Saldhig: Qorshaha Waxqabadka Guriyeynta Kanada
- Saldhig: Taageeridda Dabaqadda Dhexe
- Saldhig: Maalgelinta Shaqaalaha iyo Dhaqaalaha Koraaya ee Kanada

**Xiriirada**

**Warbaahintu waxay la xidhiidhi kartaa:**

Katherine Cuplinskas
Xoghayaha Warfaafinta iyo La-taliyaha Sare ee Isgaarsiinta
Xafiiska Ra'iisul Wasaare ku xigeenka ahna Wasiirka Maaliyadda
Katherine.Cuplinskas@fin.gc.ca

Xiriirka Warbaahinta
Waaxda Maaliyadda Kanada
mediare@fin.gc.ca
613-369-4000

**Weydiimaha guud**
Taleefanka: 1-833-712-2292
TTY: 613-369-3230
E-mailka: financialpublic-financepublique@fin.gc.ca